



## Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay u diyaargaroobayaan cimiladda aadka u qabow

Haddii sanadkii aan soo dhaafnay jawiga cimiladu jiilaalku ahaa mid dheeraaday oo ay soo noqnoqtay cimilo baraf keentay waa in aan sii sheegnaa inay iman karto mar labaad, markaa waa fikrad wanaagsan in aan ka sii diyaargarowno xilliga jiilaalka iminka.

Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) waxa ay sameynaya diyaargarow dhowr jihoo ah xilligan, iyada oo laga bilaabayo in la hubiyo mar labaadna la hubiyo nidaamka kuleyliya dhismaha. “ Sir ma aha in inta badan iskuuladeenu yihiin dhismayaal gaboobay oo leh qalabka wax kuleyliyo oo waqtii dheer la jiray, ilaha hawada ka soo gasho iyo qasabaduhuba. Wax aan hore u hubineynaa inii suurtagal ah qalabka sidii ay u noqon lahaayeen kuwo diyaar ah,” sidaas waxaa yiri Jere High, Madaxa Dayactirkha iyo Hawlgalada ee Dugsiyada Dadweynaha Portland.

Mar haddii ay ardayda iyo shaqaaluhu ay ku jiraan dhismaha gudhiisa, markaa arrimuhu waa hawshu sideedii ha ahaato. Laakiin haddii ay runtii bannaanku yahay qabow, waxa dhacaysa in iskuulo badan hawlihii ay bannaanka nasashdii ardayda ku qaban jireen ay ku qabtaan gudaha iskuulka, sidoo kalena ay jadwaladii ay dib u hagaajiyaan sidii ay u yareyn lahaayeen in ay jawigaa qabow ay ardayda ku dhaco.

Marka runtii la dareemaa cimiladda aadka u qabow waa waqtiyada lagu soo socdo iyo waqtiyada laga soo noqonayo iskuulada. Waana taasi sababta ay waalidiinta Dugsiyada Dadweynaha Portland ay waxa ugu fiican ee ay sameysan karaan ay tahay in ay u diyaargaroobaan. “ Waxa aanu waalidiinta kula talineynaa in ay ardayda marka ay u soo dirayaan iskuulada ay u soo xiraan dhar culus oo ka celiya qabowga, laakiin ay boorsadooda ugu soo ridaan funaanada iyo koofiyada qabowga ka celisa oo dheeraad ,” sidaas waxaa yiri Molly Emmons, Madaxa Arrimaha Degdega ee Dugsiyada Dadweynaha Portland. “Xitaa haddii saadaasha jawiga cimiladu aanu ahayd mid sidaas u sii qabow- waxa aynu dhammaanteen hore u aragnay in saadaasha cimiladu uu qaldamo.”

Adeegyada basaska gaar ahaan dhulka joogoodu sareeyo ee Koonfur-galbeed iyo Waqooyi-galbeed Portland waxa suurtagal ah in barafku uu kala xidho, iyada oo ay sabab u tahay roobka iyo waxyaabaha dabeylaha xooga lihi wataan. Si aad warar dheeraad ah u hesho oo ku saabsan gaadiidka waqtiga cimiladu ay xun tahay ayna ka mid yihiin jidadka waqtiga bararka jiro basaska iskuulku marayaan, waxaad booqataa halkan [Snow and Ice Transportation Information page](#).

Dadaalada ay Dugsiyada Dadweynaha Portland dhammaan wadaan waa nabadgelyada ardayda iyo shaqaalaha in loo diyaaro xilliga jiilaalka. “Waxa aanu wax walba ku eegeynaa muraayada nabadgalyada,” sidas waxaa yiri High. “Waxa suurtagal ah in magaaladu jidatkeedu noqdaan kuwa laga shaqeeyey, waxa dhici karta in meelaha lagu lugooyo iyo goobaha laga galo iskuuladu ay noqdaan kuwa aad u khatar ah. Markaa iyada oo aan ku jirno marxaladihi u diyaargarowga waxa aanu mudnaanta siin doonaa meelaha aan diirada saaraneyno in barafka laga guro, sida meelaha laga soo galo goobaha lagu lugooyo, meelaha basaska laga dego/laga koro, iyo iridaha ay shaqaaluhu ka soo galaan.”

High wuxuu leeyahay Dugsiyada Dadweynuhu waxa ay qandaraas ku bixin doonaan cid barafka ka gurta goobaha lagu lugooyo iyo meesha baabuurta la dhigo, si loo hubiyo in iskuuladu ay haystaan majarafado iyo meelo lagu dhalaaliyo barafka, sidoo kalena la cusbooneysiyo heshiisyada shaqaalaha si loo kordhiyo tirada shaqaalaha diyaara ee barafka guraya. Iyada oo intaas oo dhami ay caawin doonaan sidii Dugsiyada Dadweynaha Portland u maareyn lahaayeen jiilaalka, haddii uu baraf xoog badani dhaco sidii sanadkii hore, waxa ay nabadgelyadu ku jirtaa dhammaan in la xiro iskuulada.

*-Jon Coney*